Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka
الـهيئـة الوطـنيـة للإتـصالات
National Communications Authority

HANAANKA QARAN EE MAAREYNTA KHATARAHA AMNIGA SAAYBARKA

Nuqul Kooban



JUUN 2026

https://nca.gov.so

Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka
الـهيئـة الوطـنيـة للإتـصـالات
National Communications Authority

This document is produced by
National Communication Authority (NCA).

HANAANKA QARAN EE MAAREYNTA KHATARAHA AMNIGA SAAYBARKA

https://nca.gov.so

Table of Contents

1. Hordhac---- 4
2. Ujeeddooyinka Hannaanka ---- 5
3. Dhaqangalka Hannaanka (Applicability of the Framework)---- 5
4. Awoodda Sharci (Authority)---- 5
5. Aragtid Guud ee Maareynta Khataraha (Risk Management Concepts)---- 5
6. Erayada Asaaska ah: ---- 6
7. Baaxada Qiimeynta Khatarta (Scoping Risk Assessments) ---- 8
8. Aragtiyaha Qiimeynta Khataraha (Risk Assessment Perspectives) ---- 8

8.1. Aragtida Dibadda (External Context) ---- 8

8.2.3. Aragtida Gudaha (Internal Context) ---- 8

8.3. Aragtida Mashruuca (Project Context) ---- 8

9. Qeexidda Agabka (Identify the Assets) ---- 8

9.1. Ujeeddooyinka Qeexidda Agabka (Objectives of Asset Identification)---- 9

9.2. Mas'uuliyadda Haw-wadeenka Agabka (Asset Owner)---- 9

9.3. Kala-soocidda Agabka (Asset Classification)---- 9

10. Amniga Mareegta / Domains (Security Domains)---- 9

11. Qiimaynta Agabka ---- 9

11.1. Heerarka Saameynta Ganacsi (Business Impact Levels)---- 10

12. Qeexida Ilaha Hanjabaada (Identifying Threat Source) ---- 10

12.1. Heerarka Hanjabaadda ---- 11

12.2. Qiimaynta Ilaha Hanjabaadda---- 12

12.3. Noocya iyo Heerka Fal-gale Hanjabaad (Threat Actor) ---- 12

13. Qiimaynta Khataraha---- 13

13.1. Heerarka Khatarta (Risk Levels)---- 14

14. Maareynta Khataraha Amniga Saaybarka (Cybersecurity Risk Treatment Methodology) ---- 15

15. U Hoggaansanaanta iyo Kormeerka Maareynta Khataraha---- 15

16. Gunaanad ---- 16

1. Hordhac

Soomaaliya waxay horumar ballaaran ka sameysay dhanka dhijitaalka, gaar ahaan casriyeynta adeegyada dowladda, kobcinta adeegyada ay bixiyaan shirkadaha gaarka loo leeyahay, ballaarinta kaabeyaasha isgaarsiinta, horumarinta adeegyada maaliyadeed, iyo adeegyada kale ee muhiim ah bulshada. Horumarkan dhijitaalka ah wuxuu abuuray fursado muhiim ah oo lagu xoojinayo hufnaanta iyo tayada adeegyada si loo fududeeyo helitaanka adeegyada muhiimka ah iyo horumarinayo dhaqaalaha, isla markaana lagu kor u qaadaya isku-xirnaanta bulshada iyo hay'adaha dalka. Hadaba, kobaca degdegga ah ee adeegyada dhijitaalka ah wuxuu sidoo kale kordhiyey khataraha amniga saaybarka ee saameyn kara xogta, nidaamyada, adeegyada muhiimka ah, iyo kalsoonida bulshada iyo guud ahaan amniga Qaranka. Sidaas darteed, waxaa lagama maarmaan ah in la hirgaliyo hannaan qaran oo mideysan kaas oo lagu maareynayo khataraha amniga ee la xiriira Kaabayaasha Muhiimka ah ee dalka. Si looga jawaabo baahidaas, Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka waxay diyaarisay Hannaanka Qaran ee Maareynta Khataraha Amniga Saaybarka. Hannaankani wuxuu qayb muhiim ah ka yahay dadaallada Dowladda Federaalka Soomaaliya ee lagu dhisayo jawi dhijitaal ah oo ammaan ah, adkeysi leh, laguna kalsoonaan karo. Hannaankani wuxuu qeexayaa habka rasmiga ah ee Dowladda Federaalka Soomaaliya u dejisay qiimeynta, iyo maareynta khataraha amniga saaybarka ee saameyn kara Kaabayaasha Muhiimka ah (Critical Infrastructure – CI). Dhammaan hay'adaha dowladda iyo kuwa gaarka loo leeyahay ee maamula Kaabayaasha Muhiimka ah waxaa ku waajib ah inay hirgeliyaan Hannaankan, si ay u aqoonsadaan, u qiimeeyaan, uguna qeexaan heerarka khataraha si nidaamsan oo tayo leh. Sidoo kale, waa inay khatarahaas u kala hormariyaan mudnaantooda, iyadoo la raacayo shuruudaha qiimeynta khatarta, mudnaanta hay'adeed, iyo yoolalka amni ee khuseeya hay'ad kasta.

2. Ujeeddooyinka Hannaanka

Hannaankani wuxuu hagayaa maaraynta khataraha amniga saaybarka, isagoo bixinaya hab mideysan oo lagu qiimeeyo, laguna kala hormariyo khataraha saameyn kara Kaabayaasha Macluumaadka Muhiimka ah.Hannaanku wuxuu ka caawinayaa hay'adaha dowladda iyo kuwa gaarka loo leeyahay inay:

- » Fahmaan khatarta iyo saameynta ay ku leedahay hawlaha iyo yoolalka hay'adda;
- » Siiyaan hoggaanka sare warbixnta khataraha saameyn kara kaabeyaasha muhiimka ah;
- » Si qoto dheer u fahmaan hababka lagu yareeyo khataraha;
- » ogodaan sababaha keenay khatarta iyo nuglaanta ka jirta nidaamyada hay'adaha;
- » Isbarbardhigaan khataraha ka dhasha nidaamyada, teknoolajiyada, ama hababka kala duwan;
- » Dejiyaan mudnaanta khataraha u baahan in si degdeg ah wax looga qabto;
- » Dib u saxaan kahortaga khataraha iyadoo ka faa'iideysanaya casharada laga bartey dhacdooyinka ka dib;
- » Doortaan Hannaanka kala duwan ee lagu maareeyo khataraha Amniga Saaybarka;
- » fuliyaan dhammaan waajibaadka sharci iyo u hogaansanaanta haanka maareynta khataraha;
- » Helaan xog lagu saleeyey qiimeynta khataraha ka dhasha baabi'inta iyo dib-u-isticmaalka agabka, kaydka xogta, nidaamyada, iyo qalabka duugoobay.

3. Dhaqangalka Hannaanka (Applicability of the Framework)

Dhammaan hay'adaha dowladda iyo kuwa gaarka loo leeyahay ee maamula Kaabayaasha Muhiimka ah waa inay hirgeliyaan Hannaankan, si uu u hago qiimeynta iyo maareynta khataraha. Hannaanku wuxuu diiradda saarayaa khataraha saameyn kara sirta, saxnaanta, iyo helitaanka macluumaadka lagu kaydiyo ama loo isticmaalo Kaabayaasha Muhiimka ah. Sharciga Amniga Saaybarka Soomaaliya wuxuu farayaa hawl-wadeennada Kaabayaasha Muhiimka ah inay si joogto ah oo nidaamsan u sameeyaan qiimeynta khataraha amniga saaybarka ee Kaabayaasha Muhiimka ah.

4. Awoodda Sharci (Authority)

Waajibaadka iyo mas'uuliyadaha Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka, oo lagu aasaasay Qodobka 5aad ee Sharciga Isgaarsiinta Qaranka ee 2017, waxaa lagu ballaariyay Sharciga Amniga Saaybarka Soomaaliya. Sidaas awgeed, maamulka iyo hagidda amniga saaybarka dalka waxaa loo xilsaaray Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka. dhammaan hawl-wadeennada Kaabayaasha Muhiimka ah ee la magacaabay waxaa ku waajib ah inay hirgeliyaan hannaankan, isla markaana ay warbixin sanadle ah oo ku saabsan qiimeynta khataraha u soo gudbiyaan Hay'adda Isgaarsiinta Qaraka.

5. Aragtid Guud ee Maareynta Khataraha (Risk Management Concepts)

Hannaankani wuxuu ku dhisan yahay halbeegyada caalamiga ah ee ISO/IEC ee la xiriira qiimeynta iyo maareynta khataraha amniga Saaybarka. Wuxuu saldhig u yahay fahamka, qiimeynta, iyo maareynta khataraha ka dhalan kara nidaamyada, adeegyada, agabka, iyo Kaabayaasha Muhiimka ah ee dalka.

6. Erayada Asaaska ah:

No	Eray-bixin	Qeexid
1	Isla-xisaabtan (Accountability)	Awoodda fal loogu xiriirin karo cid, nidaam, ama agab gaar ah.
2	Agab (Asset)	wax kasta oo qiimo u leh hay'adda, una baahan ilaalin.
3	Xaqiijinta Asalka (Authenticity)	Hubinta saxnaanta aqoonsiga qofka ama agabka.
4	Helitaan (Availability)	In xogta ama adeegga la heli karo marka loo baahdo.
5	Xakameynno Aasaasi ah (Baseline Controls)	Waa Xakameynta amn asaas ah oo waajib ah in la hirgaliyo si loo gaaro heer amni oo adekysi leh.
6	Hufnaan (Confidentiality)	Ka hortaga helitaanka ama faafinta xog aan la oggolayn.
7	Kaabayaasha Muhiimka ah (Critical Infrastructure – CI)	Nidaamyo muhiim ah oo burburkoodu uu horseedi karo dhibaato qaran ama dhaqaale.
8	Sugnaanta Xogta (Integrity)	ilaalinta sugnaanta iyo dhammaystirka xogta
9	Macnaha Guud ee Gudaha (Internal Context)	Hannaanka gudaha ee hay'addu ku shaqeyso, sida maamulka, qaab-dhismeedka iyo siyaasadaha hay'adda.
10	Heerka Khatarta (Level of Risk)	qiimeynta khatarta oo ku saleysan suuragalnimada dhicitaanka iyo saameynta ay yeelan karto.
11	Suurtagalnimo (Likelihood)	Fursadda ay dhacdo khatar ahi ku dhici karto.
12	Khatarta Raagta (Residual Risk)	Waa khatarta sii jirta kadib marka la fuliyo tallaabooyin lagu maareynayo.
13	Khatar (Risk)	Waa saameynta hubanti-la'aanta ku yeelan karto yoolalka hay'adda.
14	Falanqaynta Khatarta (Risk Analysis)	Qiimeynta suurtagalnimada, saameynta, iyo heerka khatarta.

15	aqabalida Khatarta (Risk Appetite)	Heerka iyo nooca khatarta amni ay hay'addu aqbali karto
16	Qiimeynta Khatarta (Risk Assessment)	ogaanshaha, falanqaynta, iyo qiimeynta khataraha.
17	Wadaagista Khataraha (Risk Communication)	Wadaagista xogta khatarta iyo la-tashiga daneeyayaasha.
18	Halbeega Qiimeynta Khatarta (Risk Criteria)	Halbeega lagu qiimeeyo khataraha laguna qeexo mudnaanta khatar walba iyo heerka la aqbli karo.
19	Aqoonsiga Khatarta (Risk Identification)	Habka lagu aqoonsado, laguna qeexo ilaha iyo saameynta khataraha.
20	Qiimeynta Heerka Khatarta (Risk Evaluation)	Isbarbardhiga khatarta iyo fulinta habraaca loo dejiyay.
21	Maareynta Khatarta (Risk Management)	Hannaanka lagu maareeyo, laguna yareeyo khataraha.
22	Daaweynta Khatarta (Risk Treatment)	Tallaabooyinka lagu yareeyo, lagu sii gudbiyo, lagu aqbali karo, ama looga fogaan karo khataraha.
23	Qaybaha Amni (Security Domain)	agab, nidaam ama adeeg lagu dabaqo qorshe amni oo mideysan.
24	Handadaad (Threat)	Sabab suuragal ah oo keeni karta dhacdo waxyeello u geysan karta nidaam, adeeg, ama hay'ad.
25	Fal-gale Hanjabaad (Threat Actor)	Waa qof, koox, hay'ad, ama cid kale oo ka faa'iideysata nuglaanta si ay waxyeello u geystaan.
26	Isha Hanjabaadda (Threat Source)	Waa qof, dhacdo ama cilad farsamo oo sababi karta ka faa'iideysiga nuglaansho.
27	Nuglaan (Vulnerability)	Nuglaasho amni agab ama nidaam oo sababi karta khata amni.

7. Baaxada Qiimeynta Khatarta (Scoping Risk Assessments)

Qiimeynta khatartu waxay ka kooban tahay saddex qaybood oo asaasi ah: aqoonsiga khatarta, falanqaynta khatarta, iyo qiimeynta khatarta.

» **Aqoonsiga Khatarta:** Waa hannaan qeexaya dhacdooyinka suurtagalka ah, sababaha keena, iyo meelaha ay ka imaadeen, kuwaas oo keeni kara khasaare ama dhibaato amni.

» **Falanqaynta Khatarta:** Waa hab lagu fahmo khatarta laguna go'aamiyo heerkeeda, iyadoo la qiimeynayo suurtagalnimada ay ku dhici karto iyo saameynta ay ku yeelan karto agabka iyo kaabeyaahsa muhiimka ah.

» **Qiimeynta Khatarta:** Waa fulinta iyo qiimeynta Hannaanka maareynta khatarta ee la dejiyay, si loo go'aamiyo muhiimadda, mudnaanta, iyo khataraha la-aqbali-karo.

8. Aragtiyaha Qiimeynta Khataraha (Risk Assessment Perspectives)

Si loo xaqiijiyo qiimeyn khatar si joogto ah, lana jaanqaadaysa yoolka hay'adda, qiimeynta khataraha waa in lagu saleeyaa saddex aragtiyood oo muhiim ah: aragtida dibadda, aragtida gudaha, iyo aragtida mashruuca.

8.1. Aragtida Dibadda (External Context)

Hay'aduhu waa inay diiwaangeliyaan khatarta dibadda ee saameyn karta Kaabayaasha Muhiimka ah, sida shuruucda iyo xeerarka khuseeya, xaaladaha dhaqaale iyo siyaasadeed, weerarada soo kordhay, halbeegyada amniga, iyo filashada daneeyayaasha dibadda.

8.2.3. Aragtida Gudaha (Internal Context)

Hay'aduhu waa inay qiimeeyaan khatarta gudaha ee saameyn karta Kaabayaasha Muhiimka ah, sida maareynta khatarta, siyaasadaha, Hannaanka go'aan-qaadashada, iyo qandaraasyada. Sidoo kale, waa inay qeexaan shuruudaha khatarta ee lagu qiimeynaayo, laguna go'aaminayo khataraha la aqbali karo.

8.3. Aragtida Mashruuca (Project Context)

Qiimeynta khatartu waa inay ka mid noqotaa marxaladaha maareynta mashruuca, si shuruudaha amniga saaybarka, qandaraasyada, iyo qorshaha maareynta khatarta ka hor bilowga mashruuca walba.



9. Qeexidda Agabka (Identify the Assets)

Agab waa wax kasta oo qiimo u leh hay'adda, una baahan in laga ilaaliyo khatar kasta oo saameyn karta. Hawl-wadeennada Kaabayaasha Muhiimka ah waxaa looga baahan yahay inay xaqiijiyaan in qiimeynta khatartu ku habboon tahay agabka iyo baaxadda habraaca la dejiyey.

9.1. Ujeeddooyinka Qeexidda Agabka (Objectives of Asset Identification)

Ujeeddada qeexidda agabku waa in la sameeyo diiwaan rasmi ah oo dhammaystiran, oo lagu kaydiyo xogta agabka muhiimka ah ee hay'adda. Si loo gaaro ujeeddadan, Hawl-wadeennada Kaabayaasha Muhiimka ah waa in ay:-

» Qeexaan agabka ganacsiga iyo maculuumaadka, iyagoo si cad u qeexaya goobaha ay ku sugan yihiin iyo shaqooyinka ay qabtaan;

» Dajiyaan habraaca is-dhaafsiga xog-ta ee la xiriira agabka muhiimka ah

» Qeexaan nidaamyada kale ee si toos ah ama si dadban u taageera agab-ka muhiimka ah.

9.2. Mas'uuliyadda Haw-wadeenka Agabka (Asset Owner)

SharcigaAmnigaSaybarkaSoomaaliya wuxuu qeexayaa in Hawl-wadeenada Kaabeyaasha Muhiimka ah ay magacaabaan sarkaal mas'uulka ah maamulka kaabeyaasha iyo agabka muhiimka ah ee loo igmaday gaar ahaan muhiimada iyo mudnaanka agabka iyo kaabeyshaasha muhiimka ah iyo sidoo kale badqabka iyo kahortaga weerarada iyo khataraha suurtagalka ah ee saameyn kara agabka iyo kaabeyaasha muhiimka ah.

9.3. Kala-soocidda Agabka (Asset Classification)

Qaybta	Qeexid Kooban
Agabka Aasaasiga ah (Primary Assets)	Waa agabka iyo nidaamyada asaaska u ah fulinta adeegyada iyo yoolalka hay'adda.
Agabka Taageerada ah (Secondary Assets)	Waa agabka iyo nidaamyada taageera ama suurtageliya fulinta adeegyada asaaska ah ee hay'adda.

10. Amniga Mareegta / Domains (Security Domains)

Hirgelinta xakameyn adag ee agab walba waxay kor uma qaadeyso amniga guud ee Hay'adda oo keliya balse waxaa saameyn kara nuglaanshahada ka jira kaabayaasha kale ee ku xiran. sidoo kale, burcada internet waxay si fudud u aqoonsan karaan nuglaanshada ugu fudud ee la jabsan karo (weakest link). Sidaas darteed, hadii ay hay'addu dhammaystirto diiwaangelinta agabka (asset inventory) waxaa waajibta ah in la hirgaliyo tallaabada amniga Domains-ka (Security Domains) si loo hirgaliyo hanaan difaac mideysan.

11. Qiimaynta Agabka

Qiimeynta agabku waa tallaabada xigta ee maareynta agabka kadib marka la dhammaystiro diiwaangelinta dhamaanta agabka. Hannaankani wuxuu ku saabsan yahay in agabka loo asteeyo qiimo si guud loo fahmi karo, si loo suurtageliyo in si ammaan ah loo maamulo dhamaan agabka hay'adda. Qiimeynta agabku waxay ku saleysan tahay saameynta ganacsi ee ka dhalan karta sugnaanta iyo helitaanka agabka. Sidaas darteed, Hanaankani, wuxuu adeegsnayaa qiimeyn tayo (qualitative assessment) ku dhisan. Sidoo kale,

Hannaankani wuxuu qeexayaa halbeeg mideysan oo dhammaan hay'adaha looga baahan yahay inay u adeegsadaan qiimeynta agabka iyo cabbirka saameynta ganacsi ee ka dhalan karta khataraha la xiriira agabkaas.

11.1. Heerarka Saameynta Ganacsi (Business Impact Levels)

Hannaanka ISO/IEC 27005 wuxuu tilmaamayaa in la dajiyo hanaan rasmi ah oo lagu qiimeeyo agabka hay'adda ayna u baahan go'aan, khibrad iyo wadatashiga daneeyayaal kala duwan. Hannaankani kuma saleysna qiimaha lacageed ee agabka oo keliya, balse wuxuu diiradda saarayaa saameynta ka dhalan karta khatar amni, iyadoo saameyntaasi ay noqon karto halwagabka hay'adda ama khatar amni qaran.

Heerka Kala-saaridda (Classification Level)	Heerka Saameynta (Impact Level)	Saameynta Ganacsi (Business Impact)
Aan Qeexnayn (UNCLASSIFIED)	0	Aad u Hooseeya (Trivial)
Aan Qeexnayn – Qof Gaar ah (UNCLASSIFIED-PERSONAL)	1	Hoose (Low)
Rasmi (OFFICIAL)	2	Sare (High)
Sir (SECRET)	3	Aad u Sareeya (Extreme)
Sir Sareysa (TOP SECRET)	4	Halis ah (Catastrophic)

11.2. Jaantusyada Saameynta Ganacsi (Business Impact Tables)

Hannaankani wuxuu adeegsadaa afar (4) jaantus oo lagu qiimeeyo heerka saameynta ganacsi ee ka dhalan karta jebinta sirta, sugnaanta, ama helitaanka agabka:

- Jaantuska 1aad: Amniga, Difaaca, iyo Xiriirka Caalamiga ah
- Jaantuska 2aad: Hay'adaha Sharci-fulinta, Badqabka Bulshada, iyo Nabadgelyada Guud
- Jaantuska 3aad: Adeegyada Dadweynaha, Adeegyada Aasaasiga ah, iyo Kaabayaasha Muhiimka ah
- Jaantuska 4aad: Bangiyada iyo Adeegyadda Maaliyadeed.

12. Qeexida Ilaha Hanjabaada (Identifying Threat Source)

Hannaanka maaraynta khataraha wuxuu qeexayaa in aqoonsiga iyo diiwaangelinta ilaha hanjabaadaha ay asaas u tahay badqabka nidaamyadda iyo agabka. Ilaha Hanjabaada (threat source) waa bilowga weerar kasta oo halis gelin kara agabak iyo kaabeyaasha muhiimka ah. Ilaha hanjabaada wuxuu noqon karaa qof, koox, hay'ad, , ama cilad farsamo ama dhacdooyin kale ee nuglaansho amni, isla markaana sababi kara weerar loo geysto agabka muhiimka ah. Qiimeynta ilaha hanjabaadaha waa inay si gaar ah u tixgelisaa awoodda farsamo, ujeeddad, heerka oggolaanshaha ama hubinta shaqsi, iyo saameynta ay ku yeelan karaan sirta, sugnaanta, iyo helitaanka agabka. Natiijada qiimeyntani waxay taageereysaa fahamka khataraha ugu waaweyn iyo mudnaan-siinta tallaabooyinka difaaca ee ku habboon.

Ilaha Hanjabaada	Awood / Dhiirrigelin	Tusaale
Shaqaalaha Hay'adda	Helitaan sharci ah, dayacaad ama ujeeddo xun.	Xog la tirtiro, sir la faafiyo,
Dambi abaabulan	Dhaqaale doon; qalab farsamo iyo suuq madow.	Ku-xad gudub shakhsi ama ganacsi
Sirdoon Shisheeye (Foreign Intelligence)	Helitaan xog sharci daro, basaas dowladeed	Gudbin iyo faafin xog dowlada kale
Hacktivists (Koox abaabulan)	Dhiirrigelin siyaasadeed ama bulsho; magac raadis.	Kicin bulsho, qalalaaso amni
Adeeg bixiyeyaal	Helitaan nidaamyo iyo xog; ku-tiirsanaan qandaraas.	Hakin adeeg ama nidaam
Ururada Xagjirka ah (Extremist Organizations)	Weerar kaabeyaasha muhiimka ah, raadin xog muhiim ah	Amni daro, joojin ama waxyeelo adeeg iyo kaabeyaal muhiim ah
Musiibooyin dabiici / farsamo (Natural Disaster)	musiibo qaran sida dab, fatahaad iyo dhul-gariir	Joojin dhamaan adeegyada

12.1. Heerarka Hanjabaadda

Qiimaynta heerarka hanjabaaddu waxa ay ka kooban tahay: awoodda (capability), dhiirrigelinta (motivation), heerka baarista (vetting), iyo heerka hanjabaadda guud. Heerka hanjabaaddu waa awoodda iyo dhiirrigelinta isha hanjabaadda – wuxuuna tilmaamayaa awoodda iyo rabitaanka isha hanjabaadda ee saamaynta fal-galayaasha kale. Awoodda iyo dhiirrigelinta labadaba waxaa lagu qiimeeyaa halbeeg 1 ilaa 5, sida ku cad shaxda hoose:

Awood → / Dhiirrigelin ↓	1	2	3	4	5
1	Aad u Hooseeya (Trivial)	Aad u Hooseeya (Trivial)	Hooseeya (Low)	Hooseeya (Low)	Dhexdhexaad (Moderate
2	Aad u Sareeya (Extreme	Aad u Hooseeya (Trivial)	Hooseeya (Low)	Dhexdhexaad (Moderate)	Sare (High)
3	Aad u Hooseeya (Trivial)	Hooseeya (Low)	Dhexdhexaad (Moderate)	Sare (High)	Aad u Sareeya (Extreme)
4	Hooseeya (Low)	Hooseeya (Low)	Dhexdhexaad (Moderate)	Aad u Sareeya (Extreme)	Aad u Sareeya (Extreme)
5	Hooseeya (Low)	Dhexdhexaad (Moderate)	Sare (High)	Aad u Sareeya (Extreme)	Halis ah (Catastrophic)

12.2. Qiimaynta Ilaha Hanjabaadda

Hannaanka wuxuu bixinaayaa tusaale lagu qiimeeyo ilaha hanjabaadda iyo heerarka Hufnaanta, Sugnaanta iyo Helitaanka (C-I-A) sida ku cad Shaxda hoose:

No	Ilaha Hanjabaadda	Awood / Dhiirrigelin (C-I-A)	Heerka Hanjabaadda
1.	Sirdoonka Shisheeye	5-3	Aad u Sareeya (Extreme)
2.	Dembiyada Abaabulan	4-4	Aad u Sareeya (Extreme)
3.	Hackers/Hacktivists	4/5-4	Aad u Sareeya (Extreme)
4.	Ururada Xagjirka ah	2/4-2	Dhexdhexaad (Moderate)
5.	Saxaafiyiinta Baadhista	3-3	Dhexdhexaad (Moderate)
6.	Basaasnimada Warshadeed	3-3	Dhexdhexaad (Moderate)
7.	Shaqaalaha	5-2	Sare (High)

12.3. Noocya iyo Heerka Fal-gale Hanjabaad (Threat Actor)

Shaxda hoose waxay soo koobaysaa nooca iyo heerrka fal-gale hanjabaad sida awooda, dhiirrigelinta iyo saameyn dibadeed (external influence).

Nooca Fal-gale	Awood	Dhiiragelin	Heerka Hanjabaada
Isticmaalayaasha	3	2 / 4	Hoose / Dhexdhexaad (Low / Moderate)
Isticmaalayaasha Mudnaanta leh	5	2 / 4	Sare / Aad u sareeya (High / Extreme)
Bah-wadaagta (Partners)	5	2 / 4	Sare / Aad u sareeya (High / Extreme)
Adeeg bixiye (Suppliers)	4	2 / 4	Dhexdhexaad / Aad u sareeya (Moderate / Extreme)
Macaamiil (Consumer)	2	2 / 4	Aad u hooseeya / Hoose (Trivial / Low)
Dhinac Saddexaad (Third Parties)	4	4 / 4	Aad u sareeya / Aad u sareeya (Extreme / Extreme)
Adeeg fududeeye (Facilities)	1	1 / 4	Aad u hooseeya / Hoose (Trivial / Low)
Duse (Intruder)	5	4 / 4	Aad u sareeya / Aad u sareeya (Extreme / Extreme)
Silsiladda Agabka (supply Chain)	4	2 / 4	Dhexdhexaad / Aad u sareeya (Moderate / Extreme) Moderate / Extreme
Musiibooyin dabiici ah / farsamo (Natural Disaster)	1	0 / 0	Aad u hooseeya / Aad u hooseeya (Trivial / Trivial)

13. Qiimaynta Khataraha

Qiimeynta khatartu waxay isku xireysaa xogta laga helay diiwaanka agabka, heerarka saameynta, ilaha hanjabaadaha, nuglaanta jirta, iyo waxtarka xakameynnada la hirgeliyey. Natiijada qiimeyntu waa heer khatar oo si cad loo fahmi karo, kaas oo taageera go'aan-qaadashada, mudnaan-siinta khataraha, iyo diyaarinta qorshaha daaweynta khatarta.

Tallaabo	Faalo	Natiijo
1	Diiwaangelinta agabka, nidaamyada iyo adeegyada hay'adda	Diiwaanka agabka iyo hanaan qiimeyn.
2	ogaansho hanjabaad, nuglaanshaha iyo habraacyada jira.	Diiwaan hanjabaad iyo nuglaasho iyo heerka saameyntooda
3	Heerka suurtagalnimada iyo saamaynta khatarta	Heerka khatarta sida: hoose, dhexe, sare ama daran/halis ah
4	Isbarbar dhig halbeegyada khartaha iyo kuwa la aqbali karo	Khatar la aqbali karo ama u baahan cilad bixin.
5	Kala hormarin khatarta iyo fulin cilad bixin oo la soco daaweynta.	Xal waara iyo saameynta khatarta raagta.

13.1. Heerarka Khatarta (Risk Levels)

Heerka khatar walba waxay door muhiim ah ku leeyahay Hannaanka maaraynta khatarta, gaar ahaan marka la qiimeynayo suurtagalnimada iyo saameynta ay khatartu ku yeelan karto agabka iyo kaabeyaasha muhiimka ah. Shaxda hoose waxay si faahfaahsan u sharraxaysaa heerka, saamaynta, iyo suurtagalnimada khatar kasta.

Saamaynta ↓ / Suurtagal →	Aad u Hooseeya	Hooseeya	Dhexe	Dhexe-Sare	Sare	Aad u Sareeya
Heerka Saameynta 0	Aad u Hooseeya	Aad u Hooseeya	Hooseeya	Hooseeya	Hooseeya	Hooseeya
Heerka Saameynta 1	Aad u Hooseeya	Hooseeya	Hooseeya	Dhexe	Dhexe	Dhexe
Heerka Saameynta 2	Aad u Hooseeya	Hooseeya	Dhexe	Dhexe	Dhexe-Sare	Dhexe-Sare
Heerka Saameynta 3	Hooseeya	Dhexe	Dhexe	Dhexe-Sare	Sare	Sare
Heerka Saameynta 4	Dhexe	Dhexe	Dhexe-Sare	Sare	Aad u Sareeya	Aad u Sareeya

14. Maareynta Khataraha Amniga Saaybarka (Cybersecurity Risk Treatment Methodology)

Hannaankani wuxuu qeexayaa qaab-dhismeedka rasmiga ah ee lagu maareynayo laguna maareynayo khataraha amniga saaybarka ee lagu qeexay Hannaanka Qaranka ee Maareynta Khatarta Amniga Saaybarka. Ujeeddadiisu waa in la xaqiijiyo go'aanno hufan, joogto ah, wax-ku-ool ah, lana xisaabtami karo. Hannaanku wuxuu ku dhisan yahay halbeega ISO/IEC 27005 iyo ISO/IEC 27001, wuxuuna khuseeyaa dhammaan khataraha la mudnaan-siiyay, wasaaradaha, hay'adaha, iyo hawl-wadeennada loo qoondeeyay Kaabayaasha Muhiimka ah. Daweynta khatartu waxay ku saleysan tahay afar tiir oo waaweyn: iska-fogeyn, yarayn, wareejin/wadaagid, iyo aqbalid khatar.

Halbeega Maareynta	Faalo
Iska-fogeyn Khatar (Avoidance)	Joojin adeeg ama halw keeni karta khatar
Yarayn Khatar (Mitigation)	Marka ay jirto khatar la maareyn karo
Wareejinta Khatar (Transfer)	Marka khatar loo wareejiyo adeeg-bixiye ama dhinac seddaxaad
Aqbalid Khatar (Acceptance)	Marka khatartu ka yar tahay mid la aqbali karo

15. U Hoggaansanaanta iyo Kormeerka Maareynta Khataraha

Hannaankani wuxuu farayaa hawl-wadeennada Kaabayaasha Muhiimka ah inay sameeyaan qiimeyn joogto ah oo ku saabsan khataraha amniga saaybarka, isla markaana ay Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka usoo gudbiyaan warbixin sanadle ah. Warbixinta sanadlaha ah waa inay si cad u muujisaa habraaca lagu aqoonsaday khataraha, heerarkooda, tallaabooyinka lagu maareeyay ama lagu daweeyay, khataraha weli harsan, iyo qorshaha saxitaanka, kormeerka, ka hortagga, iyo dabagalka khataraha suurtagalka ah Sidoo kale, hawl-wadeennadu waa inay diyaariyaan, kaydiyaan, islamarkaana soo bandhigi karaan caddeymo rasmi ah oo muujinaya u hoggaansanaanta hannaankan. Caddeymahaas waxaa ka mid ah siyaasadaha, habraacyada, diiwaanka hantida, diiwaanka khataraha, natiijooyinka tijaabooyinka amniga, caddeynta tallaabooyinka saxitaanka, warbixinnada dhacdooyinka amniga, iyo go'aannada rasmiga ah ee aqbalidda khatarta.

16. Gunaanad

Hannaanka Qaranka ee Maareynta Khatarta Amniga Saaybarka wuxuu saldhig u yahay hab-raaca rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya ay ku hagayso aqoonsiga, qiimaynta, mudnaanta iyo xakamaynta khataraha saameynaya Kaabayaasha Muhiimka ah iyo adeegyada dhijitaalka ah ee Asaaska ah. Hannaankani wuxuu amniga saaybarka ka dhigayaa waajib iyo masuuliyad maamul oo si dhow ula jaanqaadaya yoolalka istiraatiijiyadeed ee hay'adaha, waajibaadka sharciga ah, joogteynta adeegyada bulshada, iyo sugidda amniga qaranka.

Si loo xaqiijiyo hirgelin dhammaystiran oo mira-dhal ah, hay'aduhu waa inay ka gudbaan diyaarinta qoraallada iyo dukumiintiyada oo keliya, una gudbaan fulin maamul oo la qiimayn karo, la xaqiijin karo, lana kormeeri karo. Ugu dambeyn, Hirgelinta hannaankan wuxuu sare u qaadi doonaa adkeysiga amniga saaybarka ee dalka, kalsoonida shacabka, ilaalinta xogta, joogteynta adeegyada muhiimka ah, iyo awoodda Soomaaliya ee ka hortagga, ogaanshaha, iyo ka jawaabidda khataraha saaybarka iyo sidoo kale xoojinta Amniga Qaranka.

Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka
الـهيئـة الوطـنيـة للإتـصـالات
National Communications Authority

This document is produced by
National Communication Authority (NCA).

HANAANKA QARAN EE MAAREYNTA KHATARAHA AMNIGA SAAYBARKA

https://nca.gov.so

Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka
الـهيئـة الوطنيـة للإتـصالات
National Communications Authority

HANAANKA QARAN EE MAAREYNTA KHATARAHA AMNIGA SAAYBARKA

https://nca.gov.so